JAMHUURIYADDA FED. SOOMAALIYA
GOLAHA SHACABKA
SOO GELID
NO: 378
TR: 10/11/13
SAXIIX:

Ku: Guddoomiyaha Golaha Shacabka Federaalka Soomaaliya =Muqdisho=

(Mudane Prof. Maxamed Sheekh Cusmaan – Jawaari)

Ujeeddo: Soo gudbin Motion.

Muqdisho 08-11-2013

Mudane Guddoomiye,

annagoo cuskaneynaa Qod. 77-aad ee Xeer-Hoosaadka, faqradada 1-aad iyo 4-aad iyo Qodobka 69-aad ee Dastuurka KMG ah faqradda 2-aad, xarafka **c**, ayaa waxaan halkaan kuugu soo gudbineynaa motion ku saabsan in Wasiirka Gaashaandhigga iyo Wasiirka Arrimaha Gudaha & Amniga Qaranka ay horyimadaan Xarunta Golaha Shacabka si ay uga jawaabaan su'aalahaan hoos ku qoran:

1. Maxaa u qorsheysan Wasaaradda Gaashaandhigga si nabadgelyo u helaan shacabkaas sida bani'aadannimada ka baxsan loo xasuuqay?
2. Shacabkaas ku nool tuulooyinkaas, waxay noo sheegeen in Ciidankii Gurmadka ahaa ay la safteen mid ka mid ah Beeshii weerarka ku qaadday dadkaas beeraleyda ah, haddaba maxaa keenay dhinac la safashada?
3. Wasaaradda Arrimaha Gudaha muhiim ma u aragtaa in gogol nabadeed loo fiidiyo labada beelood ee dirirta dhexmartay si xal kama dambeys ah looga gaaro dagaalladaan soo noqnoqonaya?
4. Maxay ugu talagashay Wasaaradda Arrimaha Gudaha, dadka ka soo barakacay tuulooyinka ay degganaayeen colaadda darteed?

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
HOUSE OF THE PEOPLE
GOLAHA SHACABKA

5. Maxay Wasaaradda Arrimaha Gudaha ugu diri weysay Degmada Jowhar Guddi Xaqiiqo raadin ah si ay u soo qiimeeyaan dhibka ka dhacay goobaha lagu dagaallamay?

Sababta keentay inaan motion-kaan u soo gudbinno waxay tahay kadib markii xasuuq ba'an loo geystay shacabka ku nool tuulooyinka hoos yimaada Degmada Jowhar iyadoo aan haba yaraatee Wasiiradda Gaashaandhigga iyo Arrimaha Gudaha & Amniga aysan wax tallaabo ah qaadin balse ay indhaha ka qabsadeen dilka, dhaca, barakaca loo geystay shacabkaas masaakiinta ah.

Ugu dambayn waxaa qoraalkaan ku lifaaqan magacyada iyo saxiixyada Xubnaha soo diyaariyey motion-kaan.

MOTION

MUQDISHO 08-11-2011

1. Xil. CABDI VEL IBRAHIM Sh. MUDEEY
2. " MAX'ED MAX'WD XAYD
3. " MAX'ED CUMAR MAX'WD
4. " BURCI M. XAMSA
5. " Ibrahim Salah Bayfallah
6. " Cisman Maxamed Ollahi
7. " Maxamud Maxamed Jimcale
8. " Ollahi Axmed Xuseen
9. " Yusuf Mohamed Ismail
11. " Abdinasir Mohamed Ali
12. " Maryam Aweis Jama
13. " Mohamed Ahmed Keynan
14. Tahlil Abd. Mohamed
15. " Mohamed Omar Aimoi
16. " Hussein Mohamed Muse
17. " Abdullahi Olad Roble
18. " HASSAN IBRAHIM MOHAMED
18. " ABDULLAHI GODAH BARRE
19. Abdullahi Omar Abshir
20. " Yasin Abdi Sed
21. Mohamud Ahmed M. Kullahi

JAMHUURIYADDA FED. SOOMAALIYA
GOLAHA SHACABKA
SOO GELID
NO: 477
TR: 9/10/13
SAXIIX:

XEEREY

fadlan copy motionka Guddiga
joogtada ah copy iigusoo
XIL. OSMAN X. cali

9/10/13

BAARLAMAANKA FEDERAALKA EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA
THE FEDERAL PARLIAMENT OF SOMALI REPUBLIC
OFFICE OF SECRETARY GENERAL
XAFIISKA XOGHAYAHA GUUD